



Macluumaadka barbaarin-horaadka ee loogu talagalay waalidka iyo mas'uuliyiinta carruurta

Waalidka iyo mas'uulka sharafta lahow!

Waxaan halkan kuugu soo uruurinayay macluumaad ku saabsan muhiimadda ay barbaarin-horaadka u leedahay cunugga, noocyada waxqabadka iyo qabanqabinta barbaarin-horaadka iyo billaabista barbaarin-horaadka. Dhammaadkana waxaa ku jira qoraal yar oo soo koobaya sharciyada iyo dukumentiyada haga barbaarin-horaadka.

Maamulka waxbarashada oo la shaqaynaya wasaaradda waxbarashada iyo dhaqanka, wasaaradda caafimaadka iyo arrimaha bulshada iyo Hay'adda caafimaadka iyo nololwanaagga ayaa qoray oo dejiyay macluumaadka.

Cunuggu xaq ayuu u leeyahay barbaarin-horaadka

Barbaarin-horaadku waa waxqabad qorshaysan oo hadaf leh oo la siiyo carruurta ay da'doodu u dhexeyso 0–6 sano. Barbaarin-horaadku waa xaq uu cunuggu leeyahay shaqadiisa ugu muhiimsanna waa, in iyadoo waalidiinta lala shaqaynayo la taageero koritaanka, horumarka, waxbarashada iyo nololwanaagga cunugga. Mas'uuliyadda koowaad ee barbaarinta carruurta waalidka ayeey saarantahay, barbaarin-horaadkuna waxay taageeraysaa shaqadan barbaarinta ah.

Barbaarin-horaadku waa qayb ka mid ah nidaanka waxbarashada Finnishka. Hawsha barbaarin-horaadku waa horumarinta waxbarashada daa'in ka ah iyo hirgelinta u sinnaanta waxbarashada. Cilmibaaris badan ayaa barbaarin-horaadka lagu sameeyaa iyadoo lagu salaynayo macluumaadka cilmibaarista ayaana si hufan loo cusboonaysiiyay. Cilmibaarisyadu waxay muujiyeen, in barbaarin-horaadku ay saamayn badan oo wanaagsan ku leedahay cunugga iyo weliba saamayn fiican oo ay bulshada ku leedahay. Sharciga barbaarin-horaadka dartiis ayaa xannaano-maalmeedka bedelkeeda waayadan laga hadlaa barbaarin-horaad.

Barbaarin-horaadku waa wax loo dhanyahay, taas oo loola jeedo in cunug kasta uu waxqabadka uga qaybqaadan karo sidiisa. Waxaa barbaarin-horaadka lagu dadaalaa, in cunuggu uu dareemo in sida uu isagu yahay iyo xubinnimadiisa kooxda lagu aqbalayo. Cunugga oo la dhiirigeliyo islamarkaasna la siiyo fursadda waayo-aragnimada guuleysashada ayaa waxaa lagu taagerayaa horumarka isu-qabka wanaagsan ee cunugga.

Aragtida waxbarashada ee barbaarin-horaadku waxay ku salaysantahay fikradda ah, in carruurta ay wax la bartaan dadka kale iyo bey'ada. Ka mid ahaanshaha kooxda iyo asxaabta ayaa cunugga muhiim u ah. Mabaadii'da qayb ka ahaanshaha, sinnaanta, isku qiimo ahaanshaha iyo iskuduubnida ayaa haga hawlaha lagu qabto barbaarin-horaadka. Sida ku cad mabaadii'dan, aragtida, fikradda iyo si wax u arkidda cunug kasta waa la dhegeysanayaa wuxuuna cunuggu fursad u heystaa in uu saamayn ku yeesho arrimaha nololmaalmeedkiisa la xiriira. Waxaa barbaarin-horaadka lagu qaddariyaa noocyo badnaanta dhaqanka bulshada iyo bey'ada, luqadda iyo aragtida. Barbaarin-horaadka waa waxqabad ka madaxbanaan diin, aragti iyo siyaasad xisbiyeed.

Habab dhinacyo badan ayaa barbaarin-horaadka loogu taageeraa horumarka luqadda cunugga iyo barashada luqadda waxbarashada ee barbaarin-horaadka. Carruurta labo luqadle ah ama luqadaha badan isticmaala waxay barbaarin-horaadka ku isticmaali karaan kuna hadli karaan afkooda hooyo waxayna sidoo kale baranayaan luqadda waxbarashada barbaarin-horaadka.



Waxaa barbaarin-horaadka lagu qabanqaabiyaa af finnish, iswiidhish iyo saami. Afka roomaanka ayaa sidoo kale barbaarin-horaadka lagu bixin karaa, cunugga luqadda dhegoolayaasha isticmaala waxaa barbaarin-horaadka lagu siin karaa luqadda dhegoolayaasha. Waxaa intaas dheer in barbaarin-horaadka degmada ama tan gaarka loo leeyahay ay qabanqaabin karaan barbaarin-horaad labo luqadley ah ama luqad ku harqin.

Udub-dhexaadka waxqabadka barbaarin-horaadku waa cunugga: baahiyaha cunugga, waxyaabaha uu ku fiicanyahay iyo waxyaabaha uu xiiseeyo. Shaqaalaha barbaarin-horaadku waxay horumariyaan xiisaha waxbarashada ee cunugga waxayna waxbarashada u abuureen sahay wanaagsan. Shaqaalaha barbaarin-horaadku waxay cunugga la dhisaan bey'ad ay carruurta wax ugu qaban karaan iyagoo ah hawl-wadeenno firfircoon oo waxqabadka qayb ka ah. Carruurta iyo mas'uuliyiinta carruurtaba waxaa ay si ku habboon carruurta iyo waalidka looga qaybgelinayaa qorshaha, hirgelinta iyo qiimeynta.

Waxqabadka barbaarin-horaadku waxay ku salaysantahay dheel, dheeshuna door muhiim ah ayeey ku leedahay horumarinta nololwanaagga, waxbarashada iyo isdhexgalka. Carruurta waxay barbaarin-horaadka ku baranayaan ku shaqaynta kooxda iyagoo asxaabta la jooga iyo in ay is xushmeeyaan. Marka ay kooxda dhexdeeda wax ku qabanayaan, waxay carruurta waayo-aragnimo ka helayaan ku jiritaanka kooxda, waxayna sidoo kale baranayaan habdhaqannada iyo aqoonta ah, sida dadka kale loola macaamilo iyo nooca ay yihiin sharciyada dadka ka dhexeeya ee loo hoggaansamayo marka kooxda lagu jiro. Waxaa barbaarin-horaadka looga hortagaa dhibitaanka iyadoo la baranayo aqoonta habdhaqanka bulshada ee muhiimka ah. Marka lagu jiro kahortagga dhibitaanka, waxaa muhiimad weyn leh wadashaqeynta lala samaynayo qoysaska.

Waxaa cunugga barbaarin-horaadka lagu baraa garashada, muujinta iyo koontaroolidda dareenka. Garashada dareenku waa aasaaska is aqoonsashada iyo caafimaadka dhimirka ee wanaagsan. Aqoonta xisaabta, isboortiga iyo ismuujinta kala duwan ayaa iyagana la baranayaa. Waxaa barbaarin-horaadka lagu baaraa dunida ku hareereysan waxaana cunugga la baraa deegaanka iyo dadka u dhow.

Xaq ayuu cunuggu u leeyahay in uu barbaarin-horaadka ku helo taageerada uu u baahanyahay

Cunug kasta wuxuu barbaarin-horaadka xaq ugu leeyahay taageerada waxbarashada, horumarka iyo nololwanaagga. Iyadoo qayb ka ah waxqabadka ayaa cunugga loo taageerayaa si waafaqsan baahiyihiisa gaarka ah. Hawsha shaqaaluhu waa in ay cunugga siiyaan taageerada uu u baahanyahay iyagoo kaashanaya noocyada taageero ee isaga ku habboon. Waxaa taageerada cunugga loo siin karaa hab aan xadidnayn oo ah taageero guud, mid la xoojiyay ama mid gaar ah.

Asal ahaan waxaa cunugga taageerada lagu siinayaa kooxdiiisa, laakiin haddii loo baahdo waxaa taageerada lagu hirgelin karaa koox yar ama koox gaar ah. Waxaa hirgelinta taageerada la xiriiri kara tusaale ahaan waxbarashada iyo la tashiga macallinka gaarka ah ee barbaarin-horaadka, isticmaalidda qalabka caawimaadda ee kala duwan ee barbaarin-horaadka loogu baahanyahay ama in cunugga lagu caawiyo xaaladaha uu cunuggu u baahanyahay in laga caawiyo. Haddii uu cunuggu u baahanyahay noocyo badan oo taageero ah oo la xiriira horumarka, waxbarashada iyo nololwanaagga, kuwaas oo si joogto ah loo hirgelinayo, waxaa taageerada cunugga la siinayo laga gaarayaa go'aanka taageerada la xoojiyay ama taageerada gaarka ah amaba go'aanka adeegyada taageerada.

Ka sokow shaqaalaha barbaarin-horaadka, waalidka ama khabiirka daryeelka caafimaadka iyo sooshalka, tusaale ahaan kalkaalisada caafimaadka ee rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka ama dhakhtar ayaa soojeedin kara taagerada cunugga lagu siinayo barbaarin-horaadka. Taageerada lagu qabanqaabinayo barbaarin-horaadku uma baahna in loo helo aragtida khabiirka. Wadashaqeynta lala yeelanayo adeegyada sooshalka iyo daryeelka caafimaadka sida teraabiistayaasha hadalka iyo waxqabadka iyo cilmu-nafsiyaqaannada waxaa loo sameynayaa qaab ah, in taageerada cunugga la siinayo ay noqoto mid wada dhan islamarkaasna ku habboon.

Qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah, yacni vasu



Qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah waxaa loo dejiyaa cunug kasta oo ku jira xannaano-maalmeedka qoyska iyo xannaano-maalmeedka iyadoo lagala shaqaynayo shaqaalaha barbaarin-horaadka iyo waalidka cunugga. Intaas waxaa dheer in aragtida cunugga lagu xisaabtamayo marka la dejinayo qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah. Qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah waa qorshaha wadajirka ah ee ku saabsan, sida sare loogu qaadayo horumarka, waxbarashada iyo nololwanaagga cunugga u gaarka ah. Qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah waa mid warqad ku qoran ama dijitaal ah. Wadahadalka wadajirka ah ayaa muhiim ah marka cunugga loo dejinayo qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah. Waxaaa suuragal ah in haddii loo baahdo turjubaan la isticmaalo marka lagu jiro wadahadallada qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah, waxaana markaas la hubinayaa in la isla fahmay arrimaha cunugga. Haddii uu cunuggu u baahanyahay in laga taageero horumarka, waxbarashada ama nololwanaagga, waxaa qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah lagu qorayaa qorshaha taageero siinta cunugga. Iyadoo la kaashanayo qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah ayaa waxaa la qiimeyn karaa hirgelinta iyo saameynta taageerada. Waa in sir ahaan loo xafidaa qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga u gaarka ah.

Marka la joogo xannaano-maalmeedka, macallinka barbaarin-horaadka ee kooxda carruurta ayaa ka mas'uul ah waxqabadka barbaarineed iyo dejinta qorshaha barbaarin-horaadka ee cunugga. Guri ku xannaaneeyaha qoysku wuxuu ka faa'iidayaan karaa marka la dejinayo qorshaha barbaarin-horaadka cunugga, aqoonta macallinka barbaarin-horaadka.

Noocyada waxqabadka iyo qabanaqaabinta barbaarin-horaadka

Waxaa barbaarin-horaadka lagu bixiyaa xannaano-maalmeedka, xannaano-maalmeedka qoyska ama barbaarin-horaadka furan sida tusaale ahaan waxqabadka naadiga iyo dheesha. Waalidka iyo mas'uuliyiinta ayaa cunuggooda u dooranaya habka ku habboon ee uu uga qaybqaadanayo barbaarin-horaadka. Degmada waxaa waajib ku ah in ay si waafaqsan dadka degmada deggan u qabanqaabiso barbaarin-horaadka. Adeeg-bixiyayaasha gaarka ah ayaa sidoo kale qabanqaabiya adeegyada barbaarin-horaadka.

Barbaarin-horaadka lagu hirgeliyo xannaano-maalmeedyada waa qaab kooxeedyo. Waxaa si waafaqsan sharciga iyo qaanuunka barbaarin-horaadka kooxaha uga shaqeeya macallimiinta barbaarin-horaadka, sosiyonoomiyaasha barbaarin-horaadka iyo xannaaneeyayaasha barbaarin-horaadka. Maamulaha xannaano-maalmeedka ayaa hoggaamiya xannaanada oo dhan.

Xannaano-maaleedka qoysku waa barbaarin-horaad lagu hirgeliyo koox yar. Waxaa xannaano-maalmeedka qoyska lagu hirgelin karaa guriga xannaaneeyaha qoyska ama kan cunugga amaba kooxda xannaano-maalmeedka qoyska oo ay ka wadashaqeynayaan labo ama saddex xannaaneeye. Xannaaneeyaha qoyska ayaa ka mas'uul ah waxqabadka kooxdiiisa carruurta ah, hirgelinta waxqabadka hadafka iyo qorshaha waxaa taageeraya hoggaanka xannaano-maalmeedka qoyska.

Waxaa xannaano-maalmeedka iyo xannaano-maalmeedka qoyska ka shaqayn kara macallimiinta gaarka ah ee barbaarin-horaadka oo ah shaqaale kooxda ka shaqeeya ama talabixiyayaal wareegga. Waxaa sidoo kale xannaano-maalmeedka qoyska ka shaqayn kara shaqaale kale oo talabixiyayaal ah, sida macallimiinta barbaarin-horaadka ee la shaqeeya carruurta asal ahaan ka soo jeedda dadka dalka u soo guuray. Waxaa sidoo kale kooxaha carruurta ka shaqayn kara shaqaale kaaliyayaal ah, sida kaaliyayaasha barbaarin-horaadka.

Waxqabadka barbaarin-horaadka ee furan waxaa loo qabanqaabiyaa qaab ah tusaale ahaan, waxqabadka jardiinada ciyaarta ama naadiga, taas oo ah barbaarin la hago oo hadaf leh. Waxaa barbaarin-horaadka furan ku



jiri kara tusaale ahaan bannaan aadis, dheel, waxbarashada farshaxanka, muusikada iyo isboortiga. Waalidka iyo mas'uuliyiinta ayaa sidoo kale carruurtooda kala qaybgeli kara waxqabadka.

Tooko xannaaneynta ee barbaarin-horaadka ee carruurta lagu siiyo barbaarin-horaadka fiidkii, habeenkii iyo weliba dhammaadka todobaadyada waxaa lagu qabanqaabiyaa xannaano-maalmeedka ama xannaano-maalmeedka qoyska. Tooko xannaaneynta waxaa cunugga loogu qabanqaabiyaa si waafaqsan baahidiisa, marka ay shaqada ama waxbaarshada waalidka ama mas'uulka kale ee cunuggu ay sidaas u baahantahay.

Billaabista cunugga ee barbaarin-horaadka

Waa in waalidka ama mas'uulku uu cunuggu u codsadaa barbaarin-horaadka afar bilood kahor xilliga loo baahanyahay barbaarin-horaadka. Haddii ay baahida barbaarin-horaadka loo qabayo ay keentay shaqo billaabis, waxbarasho, tababar ama shaqo ama waxbarasho darteed ugu guurista degmo kale baahidana aan horay loo sii saadaalin karin, waa in booska barbaarin-horaadka la codsadaa ugu dambeyn labo todobaad kahor marka uu cunuggu booska u baahanyahay. Cunuggu wuxuu ka qaybqaadan karaa barbaarin-horaadka ay degmadu qabanqaabiso ama tan uu bixiyo hawlwadeen gaar ah. Hawlwadeennada degmooyinka iyo shirkadaha gaarka ah waxay bogagooda shabakadda ku bixiyaan macluumaadyo dheeraad ah oo ku saabsan codsashada barbaarin-horaadka iyo nidaamyada la raaco marka la billaabayo.

Haddii uu cunuggu deggan yahay islamarkaasna joogo labo degmo, wuxuu xaq u leeyahay in uu labada degmaba uga qaybqaato barbaarin-horaadka. Carruurta ku jirta xaydaabka badbaadinta ku meelgaarka ah, kuwa magangelyo-doonka ah iyo kuwa haysta derajada qaxootinnimada waxay xaq u leeyihiin barbaarin-horaadka ay degmadu qabanqaabiso, haddii tusaale ahaan uu waalidku shaqeeyo, waxbarto ama ay jirto sabab kale oo kuwaas u dhiganta. Marka ay jirto xaalad degdeg ah ama duruuf kale oo loogu baahanyahay, waa in barbaarin-horaadka loogu qabanqaabiyaa labo todobaad gudohood. Marka la qabanqaabinayo barbaarin-horaadka waa in markasta laga fekeraa danta cunugga, qabanqaabinta barbaarin-horaadku waa in ay ku salaysanaataa qiimeynta baahiyaha cunugga. Cunuggu wuxuu xaq u leeyahay barbaarin-horaadka ay degmadu qabanqaabiso marka cunugga iyo qoyska la siiyo magangelyo.

Wadashaqeynta u dhexeysa barbaarin-horaadka iyo waalidka

Wadashaqeynta u dhexeysa waalidka ama mas'uuliyiinta iyo barbaarin-horaadku waxay muhiim u tahay horumarka, waxbarashada iyo nololwanaagga dhammaystiran ee cunugga. Kulmidda is qaddarinta leh ee shaqaalaha iyo waalidka u dhexeysa waxay aasaas u tahay wadashaqeynta wanaagsan. Wadashaqeyn kalsoonida leh waxay ku salaysantahay xiriir is xushmayn ah iyo firfircoonaanta labada dhinac, tusaale ahaan is-dhaafsashada akhbaarta maalinlaha ah. Hawsha shaqaalaha barbaarin-horaadku waa in dhegeystaan waalidka iyo waxyaabaha ay soojeediyaan iyo in ay sidoo kale waalidka siiyaan fursad ay uga qaybqaataan qorshaha, hirgelinta iyo qiimeynta barbaarin-horaadka cunugga. Waxaa lagu xisaabtamayaa marka wadashaqeynta lagu jiro kala duwanaanshaha luqadeed iyo dhaqan iyo noocyada kala duwan ee qoysaska. Turjubaan ayaa markasta oo loo baahdo looga faa'iidayaanayaa wadashaqeynta.

Wadashaqeyntu waxay muhiimad gaar ah leedahay marka uu cunuggu billaabayo barbaarin-horaadka, wareegitaanka hore ee barbaarin-horaadka sida beddelka kooxda, marka uu cunugga beddelanayo booska barbaarin-horaadka ama uu billaabayo waxbarasho-horaadka iyo marka lagu jiro taageerada cunugga. Waalidka iyo shaqaalaha barbaarin-horaadka ayaa si wadajir ah uga fekeraa sida ugu fiican ee loo taageeri karo horumarka, waxbarashada iyo nololwanaagga cunugga. Waxaa kale oo muhiim ah macluumaad isdhaafsiga u dhexeeya waalidka iyo barbaarin-horaadku.

Wadashaqeynta ka dhexeysa barbaarin-horaadka iyo adeegyada kale ee qoysaska carruurta leh



Barbaarin-horaadku waxay wadashaqeyn la samaysaa rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka qolooyinka kale ee loo baahanyahay ee qabanqaabiya daryeelka caafimaadka iyo adeegyada sooshalka. Waxaa wadashaqeynta lagu taagerayaa nololwanaagga cunugga iyo weliba nololwanaagga qoyska. Wadashaqeyntu waxay sidoo kale taageereysaa in cunugga loo qabanqaabiyo barbaarin-horaad tayo leh.

Waxaa si gaar ah loola shaqaynayaa rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka marka lagu jiro baaritaannada ballaaran ee caafimaadka ee marka uu cunuggu jiro $1\frac{1}{2}$ iyo 4 sano. Qiimeynta shaqaalaha barbaarin-horaadka ee ku saabsan horumarka iyo nololwanaagga cunugga waxaa iyadoo waalidka looga heysto oggolaansho qoraal ah lagula derayaa baaritaannada caafimaadka ee ballaaran. Wadashaqeynta ayaa sidoo kale muhiim ah, haddii uu cunuggu u baahanyahay in barbaarin-horaadka lagu caawiyo.

Macluumaadyada cunugga laga garan karo ama looga baaraandegayo tusaale ahaan caafimaadka ama habdhaqanka cunugga waa macluumaad shakhsi ah. Waa in macluumaadyada shakhsiga ah sir ahaan loo xafidaa. Wareejinta macluumaadka cunugga quseeya ee loo kala wareejinayo rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka iyo barbaarin-horaadka waxaa ugu horreyn lagu hirgelinayaa oggolaanshaha qoraalka ah ee waalidka, laakiin haddii loo baahdo waxaa suuraggal ah in macluumaadka la wadaago iyadoo aan waalidka oggolaansho laga haysan. Sharciga barbaarin-horaadka (540/2018) ayaa xaq u siinaya qabanqaabiyaha barbaarin-horaadka in uu qabanqaabiyayaasha daryeelka sooshalka iyo caafimaadka ama dadka xirfadlayaasha ah ka helo macluumaadyada aan laga maarmin ee cunugga oo ay tahay in sir ahaan loo xafido si loo qabanqaabiyo islamarkaasna loo hirgeliyo barbaarin-horaadka iyo qiimeynta taageerada iyadoo aan waalidka oggolaansho laga heysan.

Wadashaqeyn ayeey barbaarin-horaadku la samaynaysaa waxbarasho-horaadka iyo waxbarashada aasaasiga ah, wadashaqeyntaas oo lagu xaqiijinayo in uu cunuggu si hufan uga wareego barbaarin-horaadka isagoo waxbarasho-horaadka sii maranaya uu u sii wareego dugsiga. Waxbarasho-horaadka iyo waxqabadka kale ee lagu gaarayo hadafyada waxbarasho-horaadku wuxuu waajib ku yahay carruurta oo dhan in ay galaan sannad kahor billaabashada waajibka waxbarashada, yacni sida caadiga ah waa carruurta 6 sano jiryada ah. Waxaa intaas dheer oo ay barbaarin-horaadka wadashaqeyn la samaynaysaa maktabadaha iyo laamaha kale ee dhaqanka, laanta isboortiga iyo wakaaladda badbaadada iyo weliba jimciyadaha aragtida ee kala duwan.

Cunuggu wuxuu waajibka waxbarashada ee la dheereeyay billaabi karaa kahor billaabashada waxbarashada aasaasiga ah, haddii uu dhakhtar ama cilmi-nafsiyaqaan ku qiimeeyo in cunuggu aanu naafannimadiisa ama jirradiisa darteed ku gaari karin hadafyada loo dejiyay waxbarashada aasaasiga ah. Billaabista waajibka waxbarashada ee la dheereeyay waxay u baahantahay bayaanka khabiirka, billaabistiisa waxaa go'aan ka gaareysa degmada. Marka cunugga laga gaaro go'aanka dheereynta waajibka waxbarashada, wuxuu billaabi karaa waajibka waxbarashada isagoo ku billaabaya waxbarasho-horaadka hore marka uu jiro 4-5 sano ama waxbarasho-horaadka qaybta ka ah waajibka waxbarashada oo uu ku billaabayo 6 sano. Waalidka ayaa go'aan ka gaaraya in cunuggu uu 5 sano jir uga qaybqaadanayo waxbarasho-horaadka ka horreysa waajibka waxbarashada ee la dheereeyay.

Sharciga degsan iyo dokumentiyada haga barbaarin-horaadka

Sharciga barbaarin-horaadka (540/2018) iyo qaanuunka golaha dowladda ee barbaarin-horaadka (753/2018) ayaa barbaarin-horaadka haga. Waxaa sharciga lagu xeerinayaa xaq uu cunuggu u leeyahay barbaarin-horaadka iyo taageerada horumarka, waxbarashada iyo nololwanaagga ee lagu siinayo barbaarin-horaadka. Sharciga ayaa qeexaya hadafyada barbaarin-horaadka iyo waajibka qabanqaabinta iyo hirgelinta barbaarin-horaadka, qorshaha iyo qiimeynta barbaarin-horaadka, ku filnaanshaha shaqaalaha, ku talagelidda iyo qaab-dhismeedka iyo weliba shuruudaha ku habboonaanta ee shaqaalaha. Waxaa intaas dheer oo sharciga barbaarin-horaadka lagu xeerinayaa aqoonkororsiga dheeraadka ah ee shaqaalaha, xafidaadda xogta iyo macluumaad isdhaafsiga, kaydka xogta barbaarin-horaadka iyo barbaarin-horaadka gaarka loo leeyahay.



Barbaarin-horaadku waxay ku salaysantahay aasaaska qorshaha barbaarin-horaadka qaranka ee uu Maamulka waxbarashadu dejiyay. Aasaaska qorshaha barbaarin-horaadku waa oggolaansho ay degmada ama midowga degmooyinku amaba bixiyaha adeegga barbaarin-horaadka ee gaarka ah uu ku dejinayaan qorshayaasha barbaarin-horaadka ee soonaha. Waxaa barbaarin-horaadka loo hirgelinayaa si waafaqsan qorshayaasha barbaarin-horaadka ee deegaannada.

Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan barbaarin-horaadka waxaad ka heleysaa tusaale ahaan bogagga shabakadda ee Maamulka waxbarashada ama degmada aad deggantahay.